Booqo OHP.Oregon.gov si aad koonto (account) u samaysato isla markaana u bilawdo arjigaaga.

Nidaamka la raacayo ee Arjiga

Nidaamka aad raacayso ee arjiga loogu talagalay faa'iidooyinka Qorshaha Caafimaadka Oregon

Waxaad ogaataa waxyaalo badan oo dheeraad ah oo ku saabsan Qorshaha Caafimaadka Oregon ama ka codso internet-ka www.OHP.Oregon.gov

Ma u baahan tahay waxyaabo xirmadani ka kooban tahay oo qaab kale u qoran ama luqad kale ku qoran? Waan kaa caawin karnaa. Fadlan naga soo wac **1-800-699-9075** (TTY 711) ama waxaad codsigaaga email ugu diri kartaa **altformat.app@state.or.us**. Alternative formats include large print, Braille, audio recordings, web-based communications and other electronic formats.

¿Necesita los materiales de este paquete en otro formato o idioma? Podemos ayudarle. Llámenos al **1-800-699-9075** (TTY [personas con problemas auditivos] 711) o envíenos un mensaje a **altformat.app@state.or.us** con su pedido. Entre los formatos alternativos se hallan: letra grande, Braille, grabaciones de audio, comunicaciones basadas en Internet y otros formatos electrónicos.

Если материалы данного пакета нужны вам в другом формате или на другом языке, мы можем помочь. Пожалуйста, звоните нам по телефону **1-800-699-9075** (телетайп для слабослышащих - 711). Вы также можете выслать ваш запрос на эл. ящик: **altformat.app@state.or.us**. Альтернативный формат – это документы, напечатанные крупным шрифтом, шрифтом Брайля, в аудио записи, общение по интернету или других электронных форматах.

Quý vị có cần tài liệu trong tập hồ sơ này bằng một hình thức hoặc ngôn ngữ khác? Chúng tôi có thể giúp đỡ. Xin gọi điện thoại cho chúng tôi tại số **1-800-699-9075** (TTY- điện thoại dành cho người điếc hoặc khuyết tật về phát âm-711) hoặc quý vị có thể email yêu cầu của quý vị về **altformat.app@state.or.us**. Hình thức thay thế bao gồm in khổ chữ lớn, chữ nổi Braille, băng thâu âm, truyền tin trên trang mạng và các hình thức điện tử khác.

Tusmada

Maxay tilmaantan la raacayo kuu qaban kartaa? ... 3
Ma u baahan tahay taageero si aad u buuxiso arjigaaga? ... 3
Waa maxay Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP)? ... 3
Mudo intee le'eg ayay qaadanaysaa ka hor intaanan ogaan in aan u qalmo? ... 3
Su'aalaha la iskaga baahan yahay ... 3

TALAABADA 1 — Isku kaaya sheeg ... 4
Magaca sharciga ah ee la doorbidayo ... 4
Wuxuu isku aqoonsan yahay ... 4
Haddii aad codsanayso gargaarada OHP adiga laftaadu, ma leedahay lambarka Social Security-ga (SSN)? ... 4
Cinwaanka email-ka ... 4
Cinwaanka guriga ... 4
Cinwaanka boosta ... 4
Ma jeclaan lahayd in aad doorato wakiilada la oggol yahay ama hal ama in ka badan oo ah qof bedel ah oo lacagta la siinayo? ... 5
Su'aalaha xaraynta cashuurta ... 5
Adeegyada caafimaad ee la soo dhaafay ... 5
Barnaamijyada ku saleysan da'da ama ahaanshaha la yahay qof indho la ama naafo ah ... 5
Miyaad adiga laftaadu codsanaysaa gargaarada OHP? Haddii aad hadda leedahay OHP, miyaad rabtaa in aad sii wadato gargaarada? ... 5
Macluumaadka Qabiilka ... 5
Ma leedahay mid ka mid ah xaaladaha deganaansho ee hoosta ku qoran? ... 6

TALAABADA 2 — Xubnaha dheeraadka ah ee ka tirsan qoyska ... 7
Qofka 2 xiriirka idinka dhexeeya (qofka koowaad ee lala xiriirayo) ... 7
Haddii aadan ahayn waalidka ama waalidka aan ka dhabta ah ahayn 'step-parent' ee Qofka 2, ma waxaad tahay daryeelihiisa muhiimka ah? ... 7

TALAABADA 3 — Dhakhliga iyo lacagaha la iska jaro ... 8
Dakhliga laga helo shaqada (shaqooyinka) ... 8
Dakhliga laga helo meelo kale ... 8
Lacagaha la iska jaro ... 8
Dakhliga sanadkii ... 8

TALAABADA 4 — Su'aalaha la xiriira xubnaha dheeraadka ah ee ka tirsan qoyska ... 9
Ma jiraa qof ku qoran arjigan oo ku nool cinwaan ka duwan qofka koowaad (naftaada)? ... 9
Qof ku qoran arjigani uur ma leedahay? ... 9
Miyaa qof ku jira arjigani uurkii ay lahayd dhammaaday iyada oo wax dhashahay ama lumisay uurkii ay lahayd 3 bilood ee la dhaafay? ... 9
Ma jiraa qof aan indho qabin ama si rasmi ah oo buuxda naafo u ah? Miyuu jiraa qof u baahan qof ka caawiya waxyaabaha sida socodka, isticmaalka musqusha, qubayska ama lebiska? ... 9
Noo sheeg daryeelka urruradu iska kaashadeen (CCO) ee aad u doorbidayso qof kasta ... 10

TALAABADA 5 — Caymiska caafimaad ee hada ... 11

TALAABADA 8 — Akhri oo saxiix ... 11
Xuquuqdaada iyo Waajibaadkaaga ... 11
Soo sheegida isbeddelada ... 13
Haddii aad qabto caymis caafimaad oo kale ... 13
U xilsaarida bixinta lacagta iyo haysashada hanti ... 13
Macluumaaka kale ... 14
Xaqiijinta dakhliga iyo hantida ... 14
Ciqaabta wareejinta hantiyeed ... 15
Caddeynta iyo saxiixa ... 16

LIFAAQA A — Dadka Waayeelka iyo Naafada ah (*Medicare*) ... 16

Maxay tilmaantan la raacayo kuu qaban kartaa?

Nidaamkani wuxuu ku siiyaa macluumaad iyo tilmaamo la raacayo oo ku saabsan inta badan qaybaha ku jira *Arjiga loogu talagalay Faa'iidooyinka Qorshaha Caafimaadka Oregon*. Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan qaybtani oo aanan ku jirin nidaamkan la raacayo, fadlan wac **1-800-699-9075** (TTY 711).

Ma u baahan tahay taageero si aad u buuxiso arjigaaga?

Dadka bulshada u adeega oo xirfad leh ayaa kaa caawin kara buuxinta arjiga. Waa lacag la'aan.

Booqo **www.OregonHealthCare.gov** si aad u hesho dadka bulshada u adeega ee degaankaaga.

Ama, naga soo wac **1-800-699-9075** (TTY 711) si aad u hesho caawimaad ama codsato liiska dadka bulshada u adeega. Waxaad codsan kartaa taageero lagugu siiyo luqad kale.

Waa maxay Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP)?

Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) wuxuu bixiyaa caymiska daryeelka caafimaadka, daryeelka ilkaha, daryeelka caafimaadka dhimirka iyo daaweynta ku xadgudubka mukhaadaraadka oo loogu talagalay dadka waaweyn iyo carruurta ee Oregon. OHP waxaa sidoo kale loo yaqaan Medicaid.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan OHP, booqo **www.OHP.Oregon.gov** ama naga soo wac **1-800-699-9075** (TTY 711).

Mudo intee le'eg ayay qaadanaysaa ka hor intaanan ogaan in aan u qalmo?

Ka dib markaan qabano hawsha arjigaaga, waan kula soo xiriiri doonaa si aan kuula socodsiino in aad u qalanto. Haddii aan u baahanahay macluumaad dheeraad ah si aanu gaarno go'aan, waxaan kuu soo diri doonaa warqad. Warqadani waxay kuu sheegi doontaa waxa uu yahay macluumaadka maqan iyo sida naloogu soo diro.

Haddii aad qabto baahi caafimaad oo dhakhso ah ama aad uur leedahay, fadlan naga soo wac **1-800-699-9075** (TTY 711) wakhti kasta oo ka mid ah marka aad noo soo dirto arjigaaga ka dib.

★ Su'aalaha la iskaga baahan yahay

Su'aalaha la iskaga baahan yahay waxay wataan calaamad leh xidig midabkeedu buluug yahay (★). Kuwani waa su'aalo ay tahay in aad ka jawaabto. Haddii aadan ka jawaabin su'aal la iskaga baahan yahay, waxaa dhici karta in ay qaadato waqti dheer si loo qabto hawsha arijigaaga.

Haddii aad u baahanahay macluumaad dheeraad ah si aanu u go'aamino in u qalanto caymis caafimaad, waxaan kuu soo diri doonaa ogeysiin si aan kuula socodsiino waxa aan u baahanahay.

TALAABADA 1 — Isku kaaya sheeg

Talaabada 1, waxaan codsanaynaa macluumaad aasaasi ah oo adiga ku saabsan. Waxaad noqon doontaa qofka koowaad ee aan la soo xiriirayno. Fadlan buuxi Talaabada 1 xataa haddii aad kaliya u codsanayso xubnaha kale ee qoyska.

1. Magaca sharciga ah ee la doorbidayo

Magacaaga sharciga ah waa magaca uu isticmaalo Xafiiska Social Security-ga ama lagu bixiyay arjiga codsi ee Xafiiska Social Security-ga. Magaca sharciga ah waxaa sidoo kale lagu muujin karaa warqadaha socdaalka, Aqoonsiga dowladdu bixiso ama warqadaha dhalashada.

Waxaanu isticmaalnaa meelaha xogta lagu kaydiyo oo elektaroonig ah si aanu u fiirino macluumaadka aad ku bixisay foomkani. Waxaanu isticmaalnaa magacaaga sharciga ah si aanu u fiirino meelahan xogta lagu kaydiyo ee elektarooniga ah. Waxaad waxyaalo dheeraad oo ku saabsan meelaha xogta lagu kaydiyo ee aanu isticmaalo ka akhriyi kartaa qaybta Akhri oo Saxiix "Read and Sign," ee ku qoran bilowga bogga 11.

Magacaaga sharciga ah waa magaca aanu isticmaali doono marka aanu kuu soo dirayso ogeysiisyada.

Magaca aad doorbidayso waxaa loo isticmaali doonaa marka aad nala soo xiriirayso. Uma isticmaali doono tani ogeysiisyada.

---

3. Wuxuu isku aqoonsan yahay

OHP dadka wax ka weydiisa waxa qofku isku aqoonsan yahay sababta oo ah waxay noo tilmaamnaa in aanu ku siiyo daryeel si wanaagsan ugu habboon baahiyahaaga. Lagaagama baahna in aad OHP u sheegto waxa aad isku aqoonsan tahay jinsi ahaan. Siinta aad na siinayso macluumaadkani ma aha mid waajib ah ma saameyn doono u qalmidaada adeegyada.

---

4. Haddii aad codsanayso gargaarada OHP adiga laftaadu, ma leedahay lambarka Social Security-ga (SSN)?

SSN ayaa looga baahan yahay qof kasta oo codsanaya faa'iidooyinka caafimaad sidoo kalena leh mid. Haddii aad codsanayso faa'iidooyin oo aadan haysan SSN, noo sheeg sababta aadan u haysan SSN. Haddii aad jeclaan lahayd in lagaa caawiyo codsiga SSN, naga soo wac 1-800-699-9075.

Xubnaha ka tirsan qoyska ee aanan codsanayn faa'iidooyinku uma baahna in ay na siiyaan SSN ama noo sheegaan sababta aysan u haysan mid. Laakiin, in aad na siiso SSN waxay dedejin kartaa hawsha arjiga. Waxaanu isticmaalnaa SSN-kaaga si uu nooga caawiyo xaqiijinta macluumaadka aad na siiso, sida cadadka dakhliga aad haysato.

---

5. Cinwaanka email-ka

Waxaan naga socdan kartaa in aanu ogaysiisyada kuugu soo dirno hab elektaroonig ah. Haddii aad rabto ogaysiisyada oo hab elektaroonig ah, waxaad u baahan tahay in aad koonto ‘account' ka samaysato **www.OHP.Oregon.gov**. Ka dib marka aad samaysato koonto ‘account' waxaad noo sheegi kartaa haddii aad rabto in ogeysiisyadaada aad ku hesho email ama farriinta telefoonka ahaan. Ka dib marka aad isku diiwaan geliso ogaysiisyada oo hab elektaroonig ah, waxaan kuu soo diri doonaa warqad wadata macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida aad u helayso ogaysiisyadaada oo hab elektaroonig ah iyo ogeysiisyada weli lagu soo dirayo boostada caadiga ah.

---

8. Cinwaanka guriga

Fadlan keen cinwaanka guriga, haddii aad leedahay. Waxaad xaqiijisaa in aad raaciso Zip code-kaaga. Waxaan u baanahay ZIP code-ka cinwaanka gurigaaga si aan u xaqiijino in aad isqorto qorshe caafimaad oo u adeega degaankaaga.

Haddii aanad lahayn cinwaan guri, fadlan degaanka sii, gobolka ama Zip code-ka halka aad ku qaadato wakhtigaaga intiisa badan.

---

9. Cinwaanka boosta

Fadlan keen cinwaan boosto haddii:

- Aadan warqadaha boostada ku helin cinwaanka guriga aad leedahay; ama
- Aadan lahayn cinwaan guri; ama
- Aad qabto walwal dhanka ammaanka ah, oo ay ka mid tahay rabshadaha qoysku.

---

12. Ma jeclaan lahayd in aad doorato wakiilada la oggol yahay ama hal ama in ka badan oo ah qof bedel ah oo lacagta la siinayo?

Wakiil la oggol yahay ayaa kuu qaban kara waxyaabo sida buuxinta codsiyada iyo soo sheegida isbeddelada.

Qof beddel ah ee lacagta la siinayo waa qofka ama ururka heli kara ama isticmaali karo faa'iidooyinka la helo isaga oo kaa wakiil ah. Qofka beddelka ah ee lacagta la siinayo wuxuu kuu isticmaalaa faa'iidooyinka adiga laguugu talagalay, marka aadan adigu kari karin ama sababtu tahay adiga oo raba in uu sidaasi sameeyo. Dadka beddelka ah ee lacagta la siinayo naftooda uma isticmaali karaan faa'iidooyinkaaga caafimaadka ama faa'iidooyinka ay helaan iyaga oo kaa wakiil ah. Faa'iidooyinka ay isticmaali karaan iyaga oo kaa wakiil ah waxaa ka mid ah sida bixinta lacagta si ay caawimaad uga geysato rakibaada meel kursiga curyaanku mari karo 'wheelchair ramp'.

14-15. Su'aalaha xaraynta cashuurta

Su'aalahani waxay naga caawin doonaan in aan go'aansano macluumaadka qofka, oo uu la socdo dakhligu, ay tahay in loo isticmaalo go'aan ka gaaridda waxa aad u qalanto. Kama jawaabi karno su'aalaha gaarka ee la xiriira sida ay tahay in aad u buuxiso foomamkaaga cashuurta. Si looga wada hadlo su'aalaha la xiriira sida loo buuxinayo foomamka cashuurta, fadlan booqo **www.irs.gov** ama la tasho qof khibrad u leh cashuurta.

17. Adeegyada caafimaad ee la soo dhaafay

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo bixinta biilasha caafimaadka ee saddexdii bilood ee la soo dhaafay, waad nala soo socodsiin kartaa. Waxaanu gaari doonaa go'aan haddii aad u qalanto caymis caafimaad oo loogu talagalay bilaha aad biilasha leedahay. Waxaan kuu soo diri doonaa ogeysiin haddii aad u qalanto caymis loogu talagalay saddexdan bilood. Haddii aad u qalanto, waxaad ka codsan kartaa daryeel bixiyaha in uu biilka u diro OHP kaasi oo loogu talagalay adeegyada aad heshay.

18. Barnaamijyada ku saleysan da'da ama ahaanshaha la yahay qof indho la ama naafo ah

Marka aad codsado caymis caafimaad, waxaanu eegnaa barnaamij kasta oo caafimaad ee laga yaabo in aad u qalanto. Qaar ka mid ah barnaaijyada waxaanu eegnaa waxay ku saleysan yihiin da'da ama ahaanshaha la yahay qof indho la ama naafo ah. Haddii aanu eegno barnaamiyadani caafimaad, waxaan kuu soo diri doonaa warqad si aan balan wareysi kuugu qabano. Macluumaadka aanu u baahan doono marka la joogo wareysigu wuxuu ku jiraa **Lifaaqa A**.

19. Miyaad adiga laftaadu codsanaysaa gargaarada OHP? Haddii aad hadda leedahay OHP, miyaad rabtaa in aad sii wadato gargaarada?

Waxaa laga yaabaa in aan lagaaga baahan in aad buuxiso arji buuxa haddii qof ka tirsan qoyskaagu leeyahay caymis. Waxaad geli kartaa bar aad internet-ka ku leedahay ama wac **1-800-699-9075** (TTY 711) si aad u sameyso mid ka mid ah waxyaabaha hoosta ku qoran:

- Qof lagu daro kiiskaaga
- Dib loogu cusboonaysiiso caymiskaaga
- Loo soo sheego beddel.

20-22. Macluumaadka Qabiilka

Bixinta macmuulaadku wuxuu naga caawin doonaa in aan go'aansano in aad u qalanto xuquuqda isqorrida qaarkeed (*fiiri bogga 10*).

25. Ma leedahay mid ka mid ah xaaladaha deganaansho ee hoosta ku qoran?

Waxaanu macluumaadka aan ka helno su'aashani u isticmaalnaa si aan u go'aamino heerka caymis ee aad u qalanto.

Su'aalaha b-g, waxaa dhici kartaa in aanu su'aalahani u isticmaalno fiirinta macluumaadka aad naga siisay xaaladaada deganaansho. Lagaagama baahna in aad ka jawaabto su'aalahani marka aad buuxiso codsigaaga, laakiin waxaa dhici karta in ay gacan ka geysato dedejinta hawsha arjiga.

Nooca warqadaha socdaalka iyo kaarka ama lambarka warqadda

Waxaad liiska hoose ka fiirisaa noocyada warqaddo ee inta badan la isticmaalo iyo lambarkooda. Haddii warqadaha aad haysato aanay liiska ku qornayn, wali magaciisa waad qori kartaa. Haddii aadan haysan dhammaan macluumaadka, waxaad su'aalaha iska dhaafi kartaa iyaga bannaan. Haddii loo baahdo, waxaan kuu soo diri doonaa warqad si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Haddii aad haysato noocan warqadeed:	**Kuwan waxaad qortaa kaarka ama lambarka warqadda:**
Kaarka Degenaanshaha Rasmiga ah "Green Card" (I-551)	Lambarka Diiwaan gelinta Ajnabi: Lambarka kaarka:
Ogolaanshaha Dib u soo gelidda (I-327)	Lambarka Diiwaan gelinta Ajnabi:
Warqadda Qoxootigu ku Safro (I-571)	Lambarka Diiwaan gelinta Ajnabi:
Kaarka Oggolaanshaha Shaqo (I-766)	Lambarka Diiwaan gelinta Ajnabi: Lambarka kaarka: Taariikhda uu ku eg yahay Nooca astaanta
Fiisaha Mishiinku Aqoonsan karo ee Muhaajirka (*ee sida kooban wax u akhriya I-551*)	Lambarka Diiwaan gelinta Ajnabi: Lambarka baasaboorka
Shaabadda ee Ku meel gaarka ah I-551 (ee baasaboorku lagu dhufto ama I-94/I-94A)	Lambarka Diiwaan gelinta Ajnabi:
Diiwaanka Imaanshaha/Bixida (I-94/I-94A)	Lambarka I-94
(Diiwaanka Imaanshaha/Bixida) ee baasaboorka aanu wakhtigiisii dhicin (I-94)	Lambarka I-94 Lambarka baasaboorka Taariikhda uu ku eg yahay Dalka soo sooray
Baasaboorka Qalaad	Lambarka baasaboorka Taariikhda uu ku eg yahay Dalka soo sooray
Warqadda u Qalmidda ee la xiriirta Xaaladda Ardayga aan Muhaajirka ahayn (I-20)	Aqoonsiga SEVIS
Warqadda u Qalmidda ee la xiriirta Xaaladda Qof Booqasho Meel ku yimaada (DS2019)	Aqoonsiga SEVIS
Ogaysiiska Talaabo Qaadida (I-797)	Lambarka Diiwaan gelinta Ajnabi ama lambarka I-94
Kuwo kale	Lambarka Diiwaan gelinta Ajnabi ama lambarka I-94 Sharaxaada nooca ama magaca warqadaha

Waxyaalo dheeraad ah oo ku saaban warqadaha deganaanshaha, sii soco bogga xiga.

Sidoo kale waxaad qori kartaa warqadahan:

- Warqadaha tilmaamaya xubin ka tirsan qabiilka Hindida ama Hindida Maraykanka oo ku dhashay Canada
- Warqada u qalmidda ee Xafiiska Dib u dejinta Qoxootiga (ORR)
- Warqadaha tilmaamaya baajinta saaridda
- Amar sare oo ah in la joojo oo aan la dalka dibadiisa la isku saarin oo ay bixisay Wasaarada Amniga Gudaha (DHS)
- Warqad ka socota Waaxda Caafimaadka Maraykanka iyo Adeegyada Dadweynaha (HHS) Xafiiska Dib u dejinta Qoxootiga (ORR)
- Soo galooti Cuban ama Haitian ah
- Degan American Samoa

TALAABADA 2 — Xubnaha dheeraadka ah ee ka tirsan qoyska

Talaabada 2, waxaan codsanaynaa macluumaad aasaasi ah oo ku saabsan xubnaha kale oo qoyskaaga ka tirsan. Macluumaadka ku saabsan su'aalaha waxaanu sidoo kale codsanay qofka koowaad ee lala xiriirayo, fadlan fiiri qaybtii hore ee *Nidaamkan la raacayo ee Arjiga*.

4. Qofka 2 xiriirka idinka dhexeeya (*qofka koowaad ee lala xiriirayo*)

Waxaan rabnaa in aanu ogaado sida aad qaraabo u tihiin qofka koowaad ee lala xiriirayo. Tusaalooyinka qaarkood ee xiriirada qaraabo ee la leeyahay: waalidka aan ka dhabta ah ahayn ‘step-parent', ilme, ilmaha aan la dhalin ‘step-child', walaasha, walaalka, ayeeyo, awoowe, eedo, abti, iyo ilmo adeer. Haddii aadan qaraabo la ahayn waxaad qori kartaa "xiriir la lahayn."

5. Haddii aadan ahayn waalidka ama waalidka aan ka dhabta ah ahayn ‘step-parent' ee Qofka 2, ma waxaad tahay daryeelihiisa muhiimka ah?

Daryeelaha muhiimka ahi waa qof ay qaraabo yihiin ilmaha ee ee qaada mas'uuliyadda daryeel ee ilmaha.

Lagaagama baahna in aad ka jawaabto su'aashan haddii qofka koowaad ee lala xiriirayo uu yahay aabaha ama waalidka aan ka dhabta ah ahayn ‘step-parent'. Lagaagama baahna in aad ka jawaabto su'aashan haddii Qofka 2 yahay 19 jir ama ka weyn yahay.

TALAABADA 3 — Dhakhliga iyo lacagaha la iska jaro

Talaabada 3, waxaan codsanaynaa macluumaad ku saabsan dhakhligaaga iyo lacagaha lagaa jaro.

1. Dakhliga laga helo shaqada (*shaqooyinka*)

- Fadlan noo sheeg tirada lacagta ee adiga iyo xubnaha ka tirsan qoyskaagu aad ka sameysaan shaqada. Lacagtu waxay ka imaan kartaa cid loo shaqeeyo ama shaqo iskaa loo shaqeysto.
- Haddii aad tahay cid loo shaqeeyo, noo sheeg dakhliga guud "gross" ee aad hesho. Dakhliga guud waa tirada lacagta aad hesho canshuurta ka hor ka hor ama inta aan lacago kale laga jarin.
- Haddii aad iskaa u shaqaysato, fadlan geli lacagta ku soo gasha aad hesho. Tani waa tirada lacagta aad hesho ee ku soo gasha ka hor inta aan dhamaan kharashyada ganacsiga ku baxa laga jarin. Waxaad waxyaalo dheeraad oo ku saabsan shaqada iskaa loo shaqaysto, lacagta qofka soo gasho iyo kharashyada la iska jari karo ka akhriyi kartaa **www.irs.gov/individuals/Self-Employed**. Waxaad kharashyadaada ganacsiga ku baxa nooga sheegi doontaa su'aasha 3 ee qaybtan.
- Waxaad xaqiijisaa in aad noo sheegto haddii uu dakhligaagu bilaabmay ama joogsaday bishan. Tani waxay keeni kartaa isbeddel marka la eego in aad qalanto iyo in kale.

2. Dakhliga laga helo meelo kale

Wax inooga sheeg dakhli aad ka heli doonto meel aan ka ahayn shaqo. Waxaa jira tusaalooyinka qaarkood uu ku qoran codsigani. Tusaalooyinka kale waxaa ka mid ah: lacagaha lagu helo tababarka ‘stipends', dakhliga laga helo ammaanada, dakhliga waxbarasho, iyo mushaharka ciidamada. Waxaa jira noocyo badan oo dakhli oo kale. Fadlan macluumaadka ugu badan ee aad karto ku bixi qaybta nooca dakhliga "type of income" si aanu u ogaano haddii ay tahay in loo xisaabiyo ama aanan loo xisaabin OHP.

Haddii aad leedahay dakhliga laga helo qof la isqabi jiray ‘alimony', tani waxaa dhici karta in aanan loo xisaabin OHP. Ka jawaabida su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan lacagta laga helo qof la isqabi jiray ‘alimony', waxay naga caawisaa in aanu go'aan ka gaarno haddii ay tahay in loo xisaabiyo OHP.

3. Lacagaha la iska jaro

Wax nooga sheeg lacagaha la iska jaro iyo kharashyada shaqada iskaa loo shaqeysto ee lagu sheegan karo cashuur celintaada federaalka. Caadiyan, haddii aad lacagta canshuurta lagu xisaabiyo ‘tax credit' ku sheeganayso cashuur celintaada federaalka markaa kharashkaasi sidoo kale ugama jari kartid isla sanad cashuurta la iska qaado oo isku mid ah. Ma bixin karno wax talo ah oo canshuurta la xiriirta, laakiin waxaad booqon kartaa **www.irs.gov** ama la hadal qof khibrad u leh cashuurta wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xaaladaada gaarka ah.

4. Dakhliga sanadkii

Barnaamijyada caafimaadka qaarkood, waxaanu eegi karnaa cadadka dakhliga aad hesho ama aad u maleynayso in aad heli doonto sanadka oo dhan. Xaqiiji in aad wax nooga sheegto dhammaan dakhliga xubnaha ka tirsan qoysky helaan, ama filayaan in ay helaan, ee loogu talagalay sanadka oo dhan. Xaqiiji in aad ku darto dakhliga la helay horraantii sanadka, xataa haddii dakhligaasi joogsaday hadda.

Tusaale, waxaad Janaayo heshay lacagta shaqo la'aanta la qaato, laakiin waxaad shaqo bilawday Febraayo. Markii aad shaqada bilowday, lacagta shaqo la'aanta la qaato way joogsatay. Waxaad lacagta shaqo la'aanta la qaato ee aad heshay ku daraysaa dakhliga kale ee aan shaqada ahayn "Other unearned income."

TALAABADA 4 — Su'aalaha la xiriira xubnaha dheeraadka ah ee ka tirsan qoyska

Talaabada 4, ka jawaab su'aalaha 1-6 ee qof kasta oo ku qoran arjigaaga, haddii ay codsanayaan caymis caafimaad iyo haddii kaleba, xataa haddii ay jawaabtu tahay maya.

2. Ma jiraa qof ku qoran arjigan oo ku nool cinwaan ka duwan qofka koowaad (*naftaada*)?

Haddii qof aanu ku noolayn isla guriga sida qofka koowaad ee lala xiriirayo, waa in aan ogaana halka uu ku nool yahay. Su'aalaha kale waxay nala socodsiiyaan sababta aad ugu dartay arjigani. Waxay sidoo kale naga caawiyaan in aan ogaano haddii ay tahay in aanu isticmaalno macluumaadkiisa marka aan go'aaminayno in aad u qalanto caymiska caafimaad.

Hoosta waxaa ku qoran macluumaad dheeraad oo ku saabsan meelaha qaarkood ee qofku joogo marka uu si ku meel gaar ah u maqan yahay:

- Xarun daryeel oo bulshada ku saleysan waxay ruqsad ka haystaan Waaxda Adeegyada Dadweynaha si ay bixiyaan daryeelka muddada fog. Tusaalooyinka xarumaha daryeel oo bulshada ku saleysan waxaa ka mid ah:
  - » Daryeelka Dadka Waayeelka ah
  - » Xarumaha Daryeelka Dadka
  - » Xarumaha Dadka Naafada ah, iyo
  - » Daryeel Koox ahaaneed ee Guriga.
- Xarunta daryeelka dadka waayeelka ah waa meesha bixisa guri loogu talagalay in dadku ku noolaadaan oo ku helaan daryeel caafimaad.
- Haddii xubin ka tirsan qoysku oo joogo Isbitaalka Gobolka Oregon, waa in aad calaamadeysaa sanduuqa ku xiga Isbitaalka la dhigay "Hospitalized."

---

3. Qof ku qoran arjigani uur ma leedahay?

Haddii aadan garanayn taariikhda dhalmadaadu ku aadan tahay, waa in aad sheegtaa taariikhda aad u malaynayso ama qiyaas taariikhda dhalmadaadu ku aadan tahay. Haddii aad garanayso tirada carruurta aad filayso, qor tiradaasi. Haddii aadan garanayn, sideeda u dhaaf go'aan ayaan ka gaari doonaa u qalmidaada iyadoo ay ku xiran tahay "1". Haddii taariikhda dhalmadaada ama tirada carruurta aad filaysaa ay isbeddesho, waad na soo wici kartaa si aad noola socodsiiso.

---

4. Miyaa qof ku jira arjigani uurkii ay lahayd dhammaaday iyada oo wax dhashahay ama lumisay uurkii ay lahayd 3 bilood ee la dhaafay?

Barnaamijyada OHP waxay bixiyaan caymiska ilkaha iyo aragga oo dheeraad ah kaasi oo loogu talagalay dadka uurka leh. Caymis dheeraad ayaa sidoo kale la helayaa kaasi oo loogu talagalay laba bilood ka dib marka uur lahaanshahu dhamaado. Waxaanu dadka weydiinaa su'aashani si aanu u xaqiijino in aad ku siino faa'iidooyinka saxda ah.

Fadlan ka jawaab su'aalaha 7-15 ee kaliya dadka ku qoran arjigaaga ee codsanaya caymis caafimaad ee ka tirsan qoyskaaga.

11-12. Ma jiraa qof aan indho qabin ama si rasmi ah oo buuxda naafo u ah? Miyuu jiraa qof u baahan qof ka caawiya waxyaabaha sida socodka, isticmaalka musqusha, qubayska ama lebiska?

Dadka qaarkood ee aan indho qabin ama si rasmi ah oo buuxda naafo u ah ama caawimaad dheeraad ah uga baahan waxyaabaha kor ku qoran, waxay u qalmaan caymis caafimaad oo dheeraad ah. Su'aalahan ka jawaab si aad nooga caawiso go'aan ka gaarida in aad u qalanto caymiskan caafimaad oo dheeraad ah.

---

14. Noo sheeg daryeelka urruradu iska kaashadeen (CCO) ee aad u doorbidayso qof kasta:

Dooro qorshaha CCO ee degaanka

Waa maxay CCO?

OHP waxay leedahay qorshaha caafimaadka degaanka oo kaa caawiya in aad isticmaasho faa'iidooyinkaaga. Qorshayaashani waxaa loo yaqaan daryeelka urruradu iska kaashadeen ama CCO. CCO waxay leedahay kooxo daryeel bixiyayaal oo degaanka ah sida daryeel dhakhaatiir, la taliyayaal iyo dhakhaatiirta ilkaha oo si wadajir ah uga shaqeeya meel kuu dhow.

Dhammaan qorshayaasha CCO waxay bixiyaan faa'iidooyinka aasaasiga ee Qorshaha Caafimaadka Oregon oo isku mid ah. OHP waxay bixisaa caymiska caafimaad, ilkaha, iyo daryeelka caafimaadka dhimirka. Waxay sidoo kale bixisaa caymiska oo caawimaad ka geysataa isticmaalka mukhaadaraadka.

Waa maxay qorshayaasha CCO ee ka jira degaankayga?

Inta badan meelaha ka tirsan gobolku waxay leeyahay hal CCO. Meelaha qaarkood waxay leeyihiin wax ka badan hal. CCO laga heli karo degaankaaga ka fiiri **www.bit.ly/CCOplans**.

Wax ka badan hal qorshaha CCO oo ka jira degaankaaga? Halkan waxaa ku qoran sida loo doorto:

1. Booqo **www.bit.ly/CCOplans** si aad u aragto liiska CCO.
2. Isbarbar dhig qorshayaasha CCO oo tixgelin sii waxa qorshe kastaa bixinayo.
3. Fiiri qorshaha daryeel bixiyayaasha caafimaadka, farmashiiyayaasha, isbitaalada, iyo adeegyada oo kasta.
4. Daryeel bixiyayaasha oo dhani lama shaqeeyaan CCO ka jira degaankaaga. Haddii aad isla hadaba leedahay daryeel bixiye, weydii iyaga qorshaha CCO ee ay la shaqeeyaan. Waxaad fiirin kartaa liiska daryeel bixiyayaasha CCO oo kasta, oo loo yaqaan Buuga tilmaamaha daryeel bixiyaha "Provider Directory."
5. Go'aanso CCO ku habboon adiga iyo qoyskaaga.

Diyaar ma u tahay in aad doorato CCO?

U gudub talaabada 4, su'aasha 14 ee ku qoran codsiga OHP. Haddii aad dooran waydo, anaga ayaa kala doorashada kuu sameyn doona.

Xubnaha ka tirsan OHP qaarkood kama tirsanaan doonaan CCO

Waxaa laga yaabaa in aadan ku jirin qorshaha CCO iyada oo sababtu tahay adiga oo haysta caymis kale ama leh sabab kale oo caafimaad oo aadan u isticmaalayn CCO. Tani mararka qaarkood waxaa loogu yeeraa kaar furan ‘open card' ama kharashka adeega la bixiyo ‘fee-for-service'.

Ma jiro miyaa CCO? Dhibaato ma laha. Waxaad wici kartaa **800-562-4620** si aad u hesho caawimaad ah helida daryeel bixiye ama u waydiiso su'aalo ku saabsan helida daryeel.

Xubnaha leh Medicare waxay haystaan fursado kale oo wax lagu kala dooranayo

Lagaagama baahna in aad daryeelka caafimaadka dhimirka ka hesho qorshaha CCO. Haddii aadan rabin CCO loogu talagalay daryeelkaaga jirka, la hadal xafiiskaaga degaanka DHS si aad u sameyso isbeddelkan. Waxaad liiska xafiisyada ka heli kartaa **www.oregon.gov/dhs/offices**. Riix halka ay ku qoran tahay "Dadka Waayeelka ah iyo Dadka Waaweyn ee qaba Naafanimada Dhanka Jirka." Waxaad sidoo kale weydiin kartaa qorshayaasha Medicare eela shaqeeya CCO.

Hindida Maraykanka iyo Dhaladka Alaska waa in ay codsadaan CCO

Haddii aad tahay Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska, waa in aad codsataa qorshaha CCO. Si toos ah uma heli doontid CCO.

Hindida Maraykanka ah iyo Dhaladka Alaska ee isticmaala OHP loogama baahna in ay noqdaan qayb ka mid ah qorshaha CCO. Waxaad daryeel ka heli kartaa bixiyaha caafimaadka ee Hindida Maraykanka, sida xarunta caafimaadka qabiilka ama Adeegyada Caafimaadka Hindida Maraykanka ah (IHS). Waxaad dooran kartaa in aad wakhti kasta beddesho ama iskaga baxdo qorshahaaga CCO.

Bixiyayaasha adeegyada caafimaadka hindida maraykanka ah intooda badan waxay la shaqeeyaan CCO. Qorshayaasha CCO waxan noqon karaan kuwo waxtar leh sababta oo ah waxay kugu xiraan adeegyada daryeelka jirka, ilkaha iyo caafimaadka dhimirka.

Waxaan u sharaxnaa in Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska ay yihiin mid ka mid ah kuwa soo socda:

- Xubin ka tirsan tahay qabiil, isbahaysi, ama koox ay dowladda federaalku aqoonsan tahay.
- Eskimo ama Aleut ama Dhaladka Alaska ee kale ee uu diiwaan-geliyay Xoghayaha Arrimaha Gudaha iyadoo la raacayo Xeerka Caddaynta Dejinta Dhaladka Alaska, 43 U.S.C. 1601.
- Qof uu Xoghayaha Arrimaha Guduhu u tixgelinayo in uu yahay/tahay Hindada Maraykanka ujeeddo kasta ha ahaatee.

TALAABADA 5 — Caymiska caafimaad ee hada

Talaabadani waxay ku saabsan tahay caymiska caafimaad ee aanan ka socon barnaamijka OHP. Fadlan noo sheeg haddii wax xubno oo ka tirsan qoysku ay leeyihiin caymis caafimaad. Sidoo kale noo sheeg haddii uu jiro qof haysta dalab loogu talagalay caymis caafimaad ama u qalma. Tusaale, qof leh cidd loo shaqeeyo oo bixisa caymi caafimaad, laakiin aan isku diwaan gelin sababta oo ah waa mid aad u qaali ah. Mararka qaarkood waxaanu taageero ka geysan karnaa bixinta lacagta qofka kaga soo aada caymiska.

Xaqiiji in aad wax nooga sheegto:

- Caymis caafimaad oo gaar ah ee adiga ama qof kale bixiyaan, sida caymis maxkamad amartay in la bixiyo;
- Caymiska aad heli karto ama aad ka heli karto shirkad aad u shaqayso;
- Caymiska aad hesho adiga adeegsanayo cidd loo shaqeeyo ama shaqadaada oo joogsatay;
- Caymiska uu bixiyo waalid aan adiga kula noolayn;
- Caymiska la helo iyadoo hawl-gabnimo laga faa'iidaysanayo (*sida ciidanka*);
- Caymiska aad ku hesho dugsiga;
- Wixii caymis ah ee caymiskaaga bixinaya xataa haddii aadan ka heli karin halka aad ku nooshahay;
- Caymiska caafimaad sida OHP ee aad ka hesho gobol kale. Tani waxaa loo yaqaan Medicaid/CHIP.

TALAABADA 8 — Akhri oo saxiix

Marka aad saxiixdo arjiga, waxaad oggolaanaysaa dhammaan warbixinnada ku qoran **Talaabada 8**.

Xuquuqdaada iyo Waajibaadkaaga

Macluumaadka ku jira qaybtani waxaa ku qoran waxa Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (DHS) iyo Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) isku raacaan in ay kuu qabtaan. Waxyaabahani waa "xuquuqahaaga." Waxaa sidoo kale ku qoran waxa aad oggolaato in aad qabato marka codsato taageerada caafimaad. Waxyaabahani waa "waajibaadkaaga."

Fadlan si taxaddar leh u akhri foomkaan. Waxaad weydiisan kartaa shaqaalaha DHS in ay foomkaan kuu sharraxaan. Weydii su'aalo haddii ay jirto wax aadan fahmaynin. Waxaad oggolaatay in aad sameyso waxyaabaha qaarkood marka adiga (*iyo qoyskaagu*) aad gargaaro ka hesHAAn DHS ama OHA. Waxaa suuragal ah in lumiso gargaaradani ama dibu bixiso gargaarka adiga oo siinaya DHS ama OHA, haddii aad hesho wax ka badan intii ay ahayd in aad hesho.

Xuquuqdaada (*waxa aad ka filan karto DHS iyo OHA*):

- DHS iyo OHA waxay kugula dhaqMAYAan si qaddarin, caddaalad iyo hab edeb leh.
- Waxaad xaq u leedahay in aad wax ka waydiiso oo aad codsato barnaamij kasta oo ah DHS ama OHA. Waxaa suuragal ah in aanu tixraac ahaan kuugu dirno adeegyada kale ee aad u baahan tahay.
- Waxaad codsan kartaa in rasiid lagu siiyo markasta ee aad foom u keento xafiiska DHS ama OHA.
- Waxaad codsan kartaa in aad kulan la yeelato qof shaqaale ah. Sidoo kale waxaad codsan kartaa in aad la hadasho qof mas'uul ah.
- Waxaad codsan kartaa caawimaad si u codsato, buuxiso foomamka, ama wixii isbeddelo ah ugu soo sheegto luqadda aad doorbidayso.
- DHS ama OHA waxay ku siin doonaan macluumaad u qoran qaab ama luqad aad fahmi karto.
- DHS ama OHA waxay ku dadaalayaan in ay daboolaan baahiyahaaga gaarka ah haddii aad tahay qof naafo ah. DHS iyo OHA waxay raacaan Sharciga Dadka Naafada ah ee Maraykanka iyo Qaybtiisa 504 ee Xeerka Dhaqan-celinta.
- Waxaad codsan kartaa in aad aragto qoraalada adiga kugu saabsan ee ku jira faylka kiiskaaga.
- Haddii aad qabto "sabab fiican," waxaad codsan kartaa in aadan la shaqeyn barnaamijka masruufka carruurta. Sabab fiican macnaheedu waa in soo ururinta masruufka carruurtu in uu khatar gelin karo adiga iyo carruurtaada. DHS iyo OHA waxay ku siin doonaan foomamka lagu sharraxay sababta fiican. Foomamkaan waxay kuu sheegayaan sida Barnaamijka Masruufka Carruurta ee Oregon uu kaa caawini karo helitaanka masruufka carruurta, oo ay ku jiraan

taageerada lacageed ee caafimaadka, adiga oo iyo carruurtaada ka dhigaya kuwo badbaado ku sugan. DHS iyo OHA waxay sidoo kale ka jawaabi karaan su'aalahaaga ku saabsan sababta fiican.

- Waxyaabaha aad u sheegto DHS iyo OHA waxaana ka dhigi doonaa kuwo gaara ah oo sir ah. Waxaad 'ogaysiiska Dhacdooyinka Asturan' ee aan leenahay ka fiirin kartaa **https://apps.state.or.us/Forms/Served/me2090.pdf** ama waxaa lagu soo dhejiyay xafiisyada DHS.
- DHS iyo OHA waxay kuu sheegi doonaan inaad u qalanto gargaarada ee tirada maalmaha hoosta ku qoran gudahood:
  - » 90 maalmood oo ah ka loogu tala galay go'aanka caafimaad ee la xiriira naafanimida (*marka laga reebo xaaladdaha aan caadiga ahayn*)
  - » 45 maalmood gudahood ah oo loogu talagalay faa'iidooyinka caafimaad ee kale
- Waxaad codsan kartaa dacwad dhageysi haddii aadan kula raacsaneyn go'aanka DHS ama OHA.
- Qof shaqaale ah oo ka tirsan DHS ayaa kaa caawini karaya buuxinta dacwad dhageysiga. Haddii aad hesho adeegyada daryeelka ee guriga iyo bulshada ku saleysan ama xarumaha daryeelka dadka waayeelka ma jirto xuquuq loo leeyahay dhageysi dacwadeed oo ku saabsan sheegashada dib u soo celinta hantida. Waxyaabo dheeraad ka ogow qaybta Barnaamijka Dib u soo celinta Hantida. Waa in aad dhageysi dacwada ku codsataa muddo 90 maalmood gudahood ah markii la gaaray go'aanka.

Waajibaadkaaga (*waxyaabaha ay tahay in aad sameyso*):

Haddii aad ka tirsan tahay mid ka mid ah barnaamijyada DHS ama OHA, waa in aad:

- Siiso DHS iyo OHA macluumaad run ah, sax ah oo dhammeystiran.
- Keento wax caddeynaya waxyaabaha qaarkood ee aad soo sheegto. Haddii aadan heli karin caddeyn, waa in aad noo oggolaataa in aanu la xiriirno dadka ama hay'adaha kale si aan caddeyn u helno marka aan u baahano.
- U oggolaato shaqaalaha DHS iyo OHA in ay gurigaaga kugu soo booqdaan si ay u helaan macluumaad ku saabsan kiiskaaga.
- DHS iyo OHA u soo sheegto wixii isbeddelo ah.
- DHS iyo OHA ka caawiso in ay soo helaan caddeyn haddii kiiskaaga loo xusho in dibu eegis lagu sameeyo. Kiisasku waa kuwo si nasiib ah loo doortay si looga qayb qaato dib u eegista.
- U fasaxdo in la bixiyo macluumaadka ku saabsan masruufka carruurtaada ee laga helo Waaxda, Qaybta Masruufka Carruurta, oo la siiyo DHS iyo OHA, marka laga reebo adiga oo haysta sabab fiican.
- Codsato ama isticmaasho gargaarada qaarkood ama lacagta ee aad u qalanto. Tani waxaa ka mid noqon kara mid kasta oo ka mid ah kuwa hoosta ku qoran:
  - » Social Security-ga
  - » Hawlgabnimada tareenka
  - » Gunnada Hawlgabka Ciidanka
  - » Faa'iidooyinka laga helo koox iyo ka mid ahaanshaha urur
  - » Caymiska dhaawaca aanu qofku qaladkiisa lahayn, kaasi oo ah dhammaan caymiska baabuurka
  - » Caymiska magdhawga shaqaalaha
  - » Caymiska daryeelka mudada fog
  - » Caymiska caafimaad
  - » Medicare
- Marto baaritaankii kasta ee caafimaad ee aad u baahan tahay si aad u buuxiso arjigaaga codsi ee taageerada caafimaad.
- Dhakhaatiirta u sheegto haddii aad qabto caymis caafimaad oo kale. Tusaalooyinka hoos ku qoran:
  - » Medicare
  - » Gunnada Hawlgabka Ciidanka
  - » Caymiska magdhawga shaqaalaha
  - » Caymiska dhaawaca aanu qofku qaladkiisa lahayn, kaasi oo ah dhammaan caymiska baabuurka
  - » Caymis caafimaad oo kale
- Daryeel bixiyayaashu waa in ay kharashka u diraan caymiska kale ka hor inta aysan u soo dirin DHS ama OHA kharashka daryeelkaaga caafimaadka. Sii lambarkaaga Aqoonsiga caafimaad ee gobolku bixiyay ka hor intaadan helin adeegyada.
- Haddii loo baahdo, bixi lacagta bishii si aad u sii hesho gargaarada caafimaad iyo adeeg. Tiradan lacageed waxaa dhici karta in la isku dheeli tiro, taasi oo la xiriirta isbeddelka ku yimaada xaaladaada dhaqaale.
- 10 maalmood gudahood ugu soo sheegto Kooxda Mas'uulka ka ah Dhaawaca Qofka Soo gaara haddii adiga ama qof ka tirsan qoyskaagu kuwa hoose labadoodaba:
  - » Aad heshaan taageero caafimaad ama faa'iidooyinka Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP).
  - » Aad haysato sheegasho ka dhan ah qof oo la xiriirta dhibaato dhaawac oo uu sababay.

Soo sheegida isbeddelada

Haddii aad faa'iidooyin ka hesho DHS ama OHA, waa in aad soo sheegto isbeddelada qaarkood ee saamaynaya adiga iyo kuwo kale ee faa'iidooyinka hela. Haddii aad isbeddelka ku soo sheegin sida lagaaga baahan yahay waxaa suuragal ah in aad hesho faa'iidooyin fara badan. Qof kasta oo gurigaaga ku nool oo jira 18 sano ama ka weyn waxaa suuragal ah in laga codsado in ay dib u bixiyaan faa'iidooyinka uu helo.

Marka la oggolaado faa'iidooyinka, ogeysiintaadu waxay kuu sheegi doontaa waxa ay tahay in aad soo sheegto iyo goorta. Barnaamij kasta wuxuu leeyahay shuruudo dhanka soo sheegida la xiriirta. Waxa ay tahay in aad soo sheegto iyo goortu way kala duwanaan kartaa.

Marka aad soo sheegto isbeddel, shaqaalaha ayaa kula soo socodsiin doonaa haddii aad u baahan tahay in aad bixiso caddeyn. Haddii isbadelku saameynayo faa'iidooyinka kale ee aad hesho, hay'addu ayaa kula soo socodsiin doonta. Haddii aadan hubin in ay tahay in aad soo sheegto isbeddel, waxaad weydiin kartaa shaqaale.

Haddii aad qabto caymis caafimaad oo kale

Haddii adiga ama xubin ka tirsan qoyskaagu aad qabtaan caymis caafimaad kale, u sheeg daryeel bixiyaha (*dhakhtarka, bukaan socod eegtada, farmashiyaha ama cusbitaalka*) ka hor inta aadan daryeel helin. Haddii aad leedahay caymiska gaariga isla markaana ku dhaawacantay shil gaari u sheeg daryeel bixiyahaaga waxyaabo ku saabsan caymiska gaarigaaga. Waa inay biilka u diraan caymiska kale inta aanay biilka u dirin OHA. Haddii DHS ama OHA ay bixiyaan biilka caafimaadka ay ahayd in caymisku bixiyo, DHS ama OHA waxay qaadi doonaan tallaabo si ay lacagtooda dib ugu soo ceshadaan. Tusaale:

- Haddii DHS ama OHA ay bixiyaan biil uu ahaa caymis gaar ahi inuu bixiyo, DHS ama OHA waxay isku dayi doonaan in ay dib shirkada caymiska lacagta uga soo ceshadaan.
- Haddii DHS ama OHA bixiyaan biilka caafimaadka sidoo kale fidiyuhuna uu lacag ka helo shirkada caymiska, DHS ama OHA waxay isku dayi doonaan inay lacagtooda dib uga soo ceshadaan fidiyaha.
- Haddii DHS ama OHA ay bixiyaan biilka caafimaadka shirkada caymiskuna ay kuu soo dirto jeeg, DHS iyo OHA waxay isku dayi doonaan in lacagtaasi ay dib kaaga soo ceshadaan.

U xilsaarida bixinta lacagta iyo haysashada hanti

Si aad ugu qalanto taageero caafimaad, waa inaad u oggolaata DHS, OHA iyo CCO aad leedahay inay qaataan wixii lacag ah ee:

- Adiga ama dadka kale ee kula hela taageero caafimaad, hela ama xaqa u leh in ay ka helaan kuwa sida sharciga ah uga mas'uulka ah dhaawac ama kharash caafimaad oo ay bixiyeen taageerada caafimaad.

Tani waxaa ku jirta lacagta laga helo mid kasta oo ka mid kuwa hoosta ku qoran:

- Caymiska caafimaadka gaarka ah
- Caymiska gaariga
- Dadka
- Meelaha kale

Tani waxaa loo yaqaanaa "u xilsaaridda bixinta lacagta" loo xilsaarayo in ay dadka ka qaadaan DHS ama OHA iyo CCO. U xilsaaridda lacaguhu waa kuwo toos ah oo loogu talagalay qof kasta oo hela taageero caafimaad. Si aad u sii wadato in aad hesho taageero caafimaad, adiga iyo xubnaha kale ee qoyska (*oo ay ku jiraan carruurta dhalan doonta mustaqbalku*) waa in ay ka caawiyaan DHS ama OHA inay raadiyaan sidoo kale helaan lacag bixintani iyaga soo samaynaya dhammaan hababka soo socda:

- U sheegaan DHS, OHA iyo CCO aad leedahay in koox saddexaad dhaawacday adiga ama xubin ka tirsan qoyska iyaga oo lagu soo sheegayo muddo 10 maalmood gudahood ah.
- U bixiyaan macluumaad ku saabsan qaybaha sababay dhaawaca.
- Caawimaad uga geystaan macluumaadka kale ee la codsaday. Tani waxaa ka mid ah macluumaadka caymiska.

Waxaa jira xadi ah cadadka lacageed ee DHS ama OHA ay qaadan karaan. Ma ay noqon karto in ka badan lacagta la bixiyay ee loogu talagalay kharashyada caafimaad ee kooxdu sida sharciga ah uga mas'uulka tahay in ay bixiso.

Waxaa suurta gal ah in aanu yeelano lahaanshaha wixii lacag ah ee ay bixisay kooxda sida sharciga ah wax uga mas'uul ah si loo damaanad qaado lacagta la siinayo DHS, OHA ama CCO.

Waa in aad ku raacsan tahay in kuwa hoosta ku qoran ay diiwaannada caafimaadka siin karaan shirkadaha caymiska:

- Caafimaad bixiyayaasha
- Isbitaalada
- Shirkadaha loo shaqeeyo
- Hay'adaha dowladda

Waxaa ka mid ah macluumaadka gargaarka caafimaadka ee adiga iyo xubnaha reerkaaga ka tirsan. Waxaa tani loo sameyn doonaa oo kaliya si DHS ama OHA lacagta dib ugu helaan.

Macluumaaka kale

Isticmaalka Lambarka Social Security-ga (SSN)

Kuwa hoosta ku qoran waxaa looga baahan yahay qofkasta oo codsanaya gargaarada lacageed ama cunto inay DHS iyo OHA siiyaan lambarkooda Social Security-ga (SSN):

- Sharciyada federaalka (42 USC 1320b-7(a) iyo (b), 7 USC 2011-2036, 42 CFR 435.910, 42 CFR 435.920 iyo 42 CFR 457.340(b))
- Xeerka Maamulka Oregon (OAR 461-120-0210)

Haddii aad keento SSN, waxay dedejin kartaa hawsha arjiga codsi. Haddii qof aanu lahayn SSN, booqo **www.ssa.gov** wixii macluumaad ah ee la xiriira sida loo codsado mid.

- DHS iyo OHA waxay isticmaali doonaan SSN-kaaga si ay uga caawiso go'aanka ah inaad u qalanto gargaarada. Waxaanu SSN-kaaga u isticmaali doonaa sameynta kuwa hoosta ku qoran:
  - » Xaqiijinta dakhligaaga
  - » Xaqiijinta hantida kale
  - » Isbarbar dhigista diiwaannada kale ee gobolka iyo federaalka sida kuwa hoosta ku qoran:
    - * Adeegyada Dakhliga Hoose (IRS)
    - * Medicaid
    - * Masruufka carruurta
    - * Xafiiska Social Security-ga
    - * Faa'iidooyinka caymis ee shaqo la'aanta la helo
    - * Barnaamijyada kale ee taageerada dadweynaha.
- Waxaa suurta gal ah in DHS/OHA ay u isticmaalaan SSN-kaaga si ay u diyaariyaan ururinta macluumaad ama warbixin ay codsadeen ilaha dhaqaalaha fidiyay marka aad codsato ama aad gargaarada hesho.
- Waxaa suurta gal ah in DHS iyo OHA ay isticmaalaan ama sHAAca ka qaadaan SSN-kaaga:
  - » Haddii aanu uga baahano in aanu socodsiino hawsha barnaamijka aad dalbaneyso ama aad gargaarka ka hesho.
  - » Si loo sameeyo qiimeynta tayada iyo horumarinta hawlaha.
  - » Si loo xaqiijiyo tirada saxda ah ee lacagta iyo in dib loo soo celiyo gargaarka dheeraadka ah ee la bixiyay.
  - » Si loo xaqiijiyo in aanu qofna yeelan faa'iidooyin ka badan hal qoys.

Xaqiijinta dakhliga iyo hantida

Macluumaadka aad ku bixiso arjigani waxay noqon doonaan kuwo ay dib u eegaan isla markaana xaqiijiyaan mas'uuliyiinta federaalka, gobolka iyo degaanku. Marka aanu go'aamino u qalmidaada taageerada caafimaad, DHS iyo OHA ayaa isticmaala kuwa soo socda:

- Habka Xaqiijinta Dakhliga iyo U qalmida (IEVS)
- Habka Xaqiijinta Hantida (AVS)

AVS wuxuu ka raadiyaa kuwa hoose ee ku saabsan adiga iyo qof kasta oo loo baahan yahay si loo bixiyo macluumaadka dhaqaale marka aad codsato isla markaana hesho taageero caafimaad. AVS wuxuu raadiyaa kuwa hoose, in aad soo sheegto iyo in kale.

- Hay'adaha maaliyaddeed:
  - » Koontooyinka bangiga
  - » Koontooyinka ururada deynta
- Diiwaannada hantida dhabta ah:
  - » Guryo
  - » Dhulka
- Diiwaannada gaariga:
  - » Gawaari

DHS iyo OHA waxaa suurta gal ah in ay macluumaadka foomkaaga siiyaan saraakiisha sharciga dhaqangeliya, si looga caawiyo inay soo xiraan qof sharciga ka baxsanaya.

Barnaamijka Dib u soo celinta Hantida

Barnaamijka Dib u soo celinta Hantida waa barnaamij waxyaabo badan ka kooban oo khuseeya kuwa hoosta ku qoran:

- Taageerada Caafimaad
- Barnaamijka Dakhliga Dheeraadka ah ee Oregon
- Taageero Guud
- Dadka qaarkood ee isku waqti hela Medicare iyo taageerada Caafimaad

Ujeedada laga leeyahay dib u soo celinta hantidu waa in la raadiyo dib u bixinta lacagta iyada oo laga soo qaadayo hantida qofkii helayay uu geeriyooday. Lacagta qaarkeed waxay dib ugu noqotaa dowladda federaalka. Inta soo hartay waxaa lagu maalgeliyaa barnaamijyada loogu talagalay dadka kale ee baahan. Waxaa jira iska reebid badan oo ku aadan dib u soo celinta hantida.

Gobolku xaqa uu u leeyahay dib uga helida gargaarada ee gobolkaaga

Waxaa suurta gal ah in DHS iyo OHA ay lacag ka codsadaan gobolkaaga (*sida uu qeexayo ORS 416.350*) markaad dhimato ka dib haddii ay kugu habboon yihiin tahay xaaladaha hoosta ku qoran:

- Haddii kuwa hoosta ku qorani dhacaan, lacagta taageerada caafimaad waxaa dhici karta in laga bixiyo oo ay ka timaado hantidaada:
  - » Aad faa'iidooyinka caafimaad heshay ka dib Oktoobar 1, 2013.
  - » Aad ka weynayd 54 jir isla markaana heshay faa'iidooyinka daryeelka muddada fog.

Tani waxaa ku jirta lacagaha Qorshaha Caafimaadka Oregon (*Oregon Health Plan*) ay magacaaga ku siiyeen qorshaha maamulka daryeelka (managed care plan) ama lacagaha ay siiyeen CCO.

- Haddii kuwa hoosta ku qorani dhacaan, lacagta taageerada caafimaad waxaa dhici karta in laga bixiyo oo ay ka timaado hantidaada:
  - » Aad faa'iidooyinka caafimaad heshay ka dib Oktoobar 1, 2013.
  - » Aad ka weynayd 54 jir, ama aad haysato ammaanada 'trusts' qaarkood:
    - * Ammaanada baahiyaha gaarka ah
    - * Ammaanada dakhliga cayiman
- Haddii aad heshay faa'iidooyin adiga oo adeegsanaya mid ka mid kuwa hoosta ku qoran, waxaa laga yaabaa in ay jirto sheegasho la xiriirta hantidaada:
  - » Barnaamijka Dakhliga Dheeraadka ah ee Oregon
  - » Taageero Guud Qaarkood
  - » Gobolka waxaa looga baahnaa inuu bixiyo lacagta qaaraanka ee loogu talagalagay adiga sababta oo ah waxaad heshay taageerada caafimaad iyo Medicare Part D labadoodaba.

DHS iyo OHA waxay dib u dhigi doonaan wixii sheegasho lacageed ah haddii qofka aad isqabtaan uu nool yahay.

DHS iyo OHA ma sheegtaan lacag ay ka helaan hantidaada haddii mid ka mid ah xubnaha qoyskaagu ay wali nool yihiin:

- Ilmihii aad si caadi ah u dhashay ama aad korsatay ee da'diisu ka yar tahay 21 jir. Ogow: Tani kuma jiraan carruurta qoys hore la isku dhalay.
- Ilmihii aad si caadi ah u dhashay ama aad korsatay, da' kasta leh, kaasi oo aan indho qabin ama naafo ah sida uu qeexayo xeerka Social Security-gu.

Ogow: Sharciyada iyo xeerarka ku saabsan sheegashooyinka ka dhanka ah gobolka waxaa suurta gal ah in ay isbeddelaan ogaysiin la'aan.

Qof kasta oo hanti ka hela hanti uu leeyahay macmiilku waxay OHA ama DHS ka codsan karaan in ay ka dhaafto dib u soo celinta hantida haddii ay buuxiyaan shuruudaha looga baahan ee loo yaqaan iska dhaafidda dhibaato jirta awgeed (hardship waiver). Tilmaamaha ku saabsan sida loo codsado iska dhaafidda dhibaato jirta awgeed (hardship waiver) waxay ku jiraan macluumaadka ay soo dirto Kooxda Dib u soo celinta Hantida marka ay bilowdo nidaamka dib u soo celinta.

Kooxda Dib u soo celinta Hantida kala xiriir:
PO Box 14021
Salem, OR 97309-5024
Telefoonka: 503-378-2884
1-800-826-5675 (*Oregon oo kaliya*)
Fax-ka: 503-378-3137

Ciqaabta wareejinta hantiyeed

Waxaa laga yaabaa in aadan u qalmin faa'iidooyinka qaarkood haddii aad wareejiyo hanti taasi oo ka yar qiimaheeda ay leedahay. Marka aad bixiso hanti ama aad hanti gado waxaan dhahnaa waxaad wareejisay hanti. Hantidu waa dakhli iyo waxyaalaha qiimaha leh. Tusaalooyinku waa kuwa hoosta ku qoran:

- Guryo
- Gawaari
- Hanti
- Lacag

Shaqaalahaaga la hadal ka hor inta aadan gadin ama aadan bixin wax hanti ah.

Haddii aad wareejiso hanti waxaa laga yaabaa in aadan u qalmin faa'iidooyinka hoosta ku qoran:

- Adeegyada daryeelka muddada fog (LTC):
  - » Guryaha daryeelka dadka waayeelka ah
  - » Xarumaha dadka naafada ah
  - » Adeegyada guriga-dhexdiisa laga bixiyo
  - » Xarumaha dadka lagu xanaaneeyo
  - » Goobo kale oo daryeel
- Taageerada Caafimaad ee Qoxootiga

Waxaan dib u fiirinaa ka hor inta aadan codsan si aan u ogaano haddii wax la xiriira wareejinta hantidu ay keenenayso ganaax:

- Marka ay noqoto LTC waxaan dib u fiirinaa 5 sano.
- Marka ay noqoto Caafimaadka Qoxootiga waxaan dib u fiirinaa 3 sano.

Ganaaxa loogu talagalay wareejinta hantidu wuxuu bilaabmaa marka aad codso ee aad u qalmayso. Ganaax ayaa lagu dabaqi doonaa kaliya faa'iidooyinka kor ku qoran. Ganaaxu wuxuu noqon doonaa in aanu diidi doono codsigaaga loogu talagalay faa'iidadaasi. Haddii aad wareejiso hanti inta aad helayso faa'iidooyin waxaa sidoo kale jiri doona ganaax. Ganaaxu wuxuu noqon doonaa in uu faa'iidooyinkaasi jooji in muddo ah. Joojinta faa'iidadaa LTC waxay hoos u dhigi karaa ama joojin kartaa faa'iidooyinkaaga caafimaad ee kale.

Caddeynta iyo saxiixa

Saxiixada aan saxiixayso codsigani, waxaad xaqiijinaysaa in aad:

- Fahamsan tahay in DHS iyo OHA waxay isticmaali doonaan xogaha iyo nidaamyada kambiyuutarka si ay u fiiriyaan macluumaadka aad ku bixisay foomkani. Kuwaasi in lagu dari karo xogaha iyo nidaamyada kambiyuutarka ee leh macluumaad ku saabsan dakhligaaga, caymiska kale ee caafimaa, oo ay ka mid yihiin Medicare, social security-ga, iyo muwaadinimada iyo xaaladaha deganaansho.
- Fahamsan tahay in qaar ka mid ah adeegyada caafimaadka iyo qalabku ay u baahan yihiin oggolaansho hore iyo in aad haysato PA ka socda DHS, OHA, Daryeelka Urruradu Iska kaashadeen (CCO), ama qorshaha daryeelka la agaasimay ka hor inta aan la ii keenin.
- Adiga iyo qofka aan isqabtaad isku raacsan tihiin in wixii lacag go'an ‘annuity' ee aad soo sheegtaan, DHS iyo OHA ay noqon doonaan ka-faa'iideyste.
- Fahamsan tahay in DHS iyo OHA aysan isticmaali doonin kharashyada loogu talagay kuwo hoose si loo ogaado faa'iidooyinka daryeelka muddada fog haddii aan anigu soo wargelin:
  - » Hoyga
  - » Caafimaadka
  - » Daryeelka carruurta
  - » Masruufka carruurta ee ay maxkamaddu amartay
- Fahamsan tahay oo aad ku raacsan tahay macluumaadka ku qoran qaybta Akhri oo saxiix "Read and sign" ee arjigani (*Talaabada 8*) iyo qaybta Akhri oo saxiix "Read and sign" ee Nidaamka la raacayo ee Arjiga.

LIFAAQA A — Dadka Waayeelka iyo Naafada ah (*Medicare*)

Waxaa laga yaabaa in aanu u baahano in aan dib u eegno u barnaamijyada iyada oo lagu saleysano da'da ama ahaanshaha la yahay qof indho la ama naafo ah haddii qof ka mid ah qoyskaagu codsanayo faa'iidooyin isla markaana yahay:

- Helayaa ama u qalmaa Medicare
- Yahay 65 jir ama ka weyn
- Codsanayaa adeegyada daryeelka mudada fog

Waxaanu u baahan doonaa macluumaadka ku jira Lifaaqan A haddii aan dib u eegno barnaamijyadani. Lagaagama baahna in aad hadda ka jawaabto su'aalaha ku qoran Lifaaqa A, laakiin waxaa dhici karta in ay dedejiso hawsha arjiga. Haddii aanu dib u eegno barnaamijyadani, waxaan kaaga baahnaan doonaa in aanu wareysi kula yeelano. Waxaanu kuu soo diri doonaa si loo qabto balan wareysi. Marka aad u timaado wareysiga, waxaanu isla eegi doonaa su'aalaha ku qoran Lifaaqa A.